



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Sibtambar 21, 2021-ka

Ku socota: Dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka iyo qoysaskooda/mas'uuliyiintooda (**Hay'adaha Maamulka Kiiska: Fadlan farriintan la wadaag dadka ka tirsan adeegyadani ee taageerada ka hela shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed**)

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Tallaalada iyo shaqaalahaaga taageerada shakhsiyeed

Farriintani waxaa loogu talagalay dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) iyo xubnaha ka tirsan qoyska iyo mas'uuliyiinta ee shaqaaleysiya shaqaalaha taageerada shakhsiyeed (PSW).

Haddii aad leedahay PWS kugu taageeraya guriga, waxaad:

- Dooran kartaa daryeel bixiyayaashaada
- Waxyaabaha aad doorbidayso la wadaagi kartaa daryeel bixiyayaashaada
- Weydiin kartaa in daryeel bixiyayaashaadu tallaalan yihiin
- Codsan kartaa caddeynta ah in daryeel bixiyayaashaadu tallaalan yihiin

Waa caadi in aad daryeel bixiyahaaga weydiiso in uu tallaalan yahay, laakiin daryeel bixiyahaagu wuxuu dooran karaa in uusan ka jawaabin.

Ka hadalka tallaalku wuxuu noqon karaa mid adag. Taageero ka codso saaxiib la isku halayn karo, xubin ka tirsan qoyska, ama maamulahaaga kiiska. Haddii aad shaqaaleysiinayso daryeel bixiye cusub, waa muhiim in aad la wadaagto waxyaabaha aad doorbidayso iyo wixii guul gaarid ah, oo ay ku jiraan tallaaladu.

Haddii aad hayso wax su'aalo ah, la xiriir Iskuduwahaaga Adeegyada ama Wakiilkaaga Shakhsiyeed (maamulaha kiiska) wayna ku taageeri karaan. Waxaad sidoo kale fiirin kartaa [ilaha ka socdo BOLI](#), oo ay ku jiraan talooyin loogu talagalay cidda loo shaqeeyo.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.